



**Eskilstuna
kommun**

Warbixin ku socota waalidiinta

Warbixin ku saabsan habka cusub ee xiriirka dugsiyada ee Vklass

Dugsiyada hoose/dhexe ee degmada Eskilstuna waxaa laga hirgeliyey hab cusub oo ku saabsan xiriirka dugsiyadaax, laguna magacaabo. Waxaad halkaas waalid ahaan kala socon kartaa waxbarashada ilmahaaga adigoo isla markaa ka qoraya marka ilmuhu dugsiya ka maqnaanayo.

Barta internet ee www.eskilstuna.se/vklass ayaad ka sii akhrisan kartaa wax dheeraad ah oo ku saabsan Vklass iyo warbixintaas oo ku turjuman afka kale.

Vklass oo kombiyuutarka laga isticmaalayo

Waxaad Vklass ka geleysaa barta www.vklass.se halkaas oo aad ku qoreyso warbixinaha lagu galo. **Waxaad warbixinahaas ka heleysaa warqad horay degmada Eskilstuna kuugu soo dirtay.**

Waa muhiim!

Marka ugu horreeya oo aad geleyso waxaa kaa hor imanaya bog aad ku qoreyso e-mailkaaga iyo lambarka moobiilkaaga. Taasi waxay muhiim u tahay si ay dugsiya ugu suuragasho in uu soo diro dhambaallo iyo warbixino.

Vklass oo laga isticmaalayo appka moobiilka iyo kombiyuutarka gacanta

Waxaad kaloo Vklass ka geli kartaa app aad soo degsaneyso oo ku kaysaneyso moobiilka ama kombiyuutarka gacanta. Appkaas Vklass waxaad si fudud maalin walba uga la soconeyso warbixinaha dugsiya, adigoo ku qori karta maqnaanshaha ilmahaaga. Waxaad gelidda halkaas u isticmaaleysaa warbixinaha aad ku gasho kombiyuutarka.

Waxaa lagugu la talinayaa inaad marka ugu oo aad gasho beddesho furaha lagu galo. Sidaas waxaad ka samayn kartaa kombiyuutarka iyo appka labadaba.

Haddaad qabto su'aalo ku saabsan Vklass, waxaa lagugu soo dhoweynayaa inaad la xiriirta dugsiya ilmahaagu dhigto

